



801 S. Fidalgo St., Suite 100  
Seattle, WA 98108

Salaam Tukwila!

**Gaariga Qashinka ee Cusub**

Dib-u-warshadeynta, Qooshka,

iyo Adeegyada Qashinka ee Cusub

**Recology.com/Tukwila**



## CUSUB! Laga bilaabo 1-da Nofeembar, 2023

Dib-u-warshadeynta Qashinka Cuntada  
& Dayrka ee Guryaha La Deggan Yahay  
ee Magaalada Tukwila, iyo Adeegyada  
Qashinka ee Shirkadda Recology

**Keydso Hagahan**



## Dadka deegaanka Tukwila,

Laga bilaabo 1-da Nofeembar, 2023, Recology waxay noqon doontaa shirkadda qashinka dib-u-warshadeysa, qashinka cuntada & deyrka ee cusub, iyo shirkadda qaada qashinkaaga. Magaalada Tukwila iyo Shirkadda Recology waxaa ka go'an in si habsami leh uga wadashaqeeyaan kala guurka. Shaqaalaha adeegga macaamiisha ee deegaanka iyo kooxaha hawlgallada ee shirkadda Recology ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan adiga iyo inay ku siiyaan adeeg tayo sare leh. Waa kuwan waxa aad filan karto inta lagu guda jiro kala guurkan:

- **Carabiyada iyo calaamadaha qashinka**  
Waxaad haysan doontaa carabiyada qashinka ee aad hadda hasyato. Midabada loogu talagalay nooc kasta oo shay ah ayaa sidooda ahaan doona. Laga bilaabo bisha Sitembar, shaqaalaha shirkadda Recology ayaa dib u calaamadeyn doona carabiyadaada qashinka marka uu gaarigu bannaanka yaala maalinta qashinka la uruurinayo.
- **Agabyada la aqbalo**  
Dib-u-eeg liisaska dib-u-warshadaynta qashinka iyo qashinka cuntada iyo kala soocida qashinka deyrka ee aan samayno ee ku qoran carabiyada qashinka ee cusub kuna jira onlaynka iyagoo ku qoran luuqado badan.
- **Maalinta adeegga**  
Maalinta laguu adeegi doono way isbeddeli kartaa. Shirkadda Recology ayaa ku ogeysiin doonta bisha Sitembar.
- **Sicirada**  
Dib-u-warshadaynta sii ahaan doontaa bilaash taas oo qayb ka ah adeegga qashin ee lagu siiyo. Sicirada qashinka ayaa kordhi doona iyadoo ugu wacan qiimaha sare u kacaya ee gaadiidka qashinka, shidaalka, shaqaalaha, iyo arrimaha kale; Sicirada qashinka cuntada iyo deyrka (adeeg ikhtiyaari ah) ayaa sidoo kale kordhi doona. Sicirada ayaa kordhi kara haddii la galayo qandaraas kasta oo cusub waxayna hadda la jaanqaadi doonaan sicirada bulshooyinka kale ee Degmada King County. Macluumaadka sicirka waxaa loo soo diri doonaa cinwaanada boosto oo dhan gudaha bisha Sebteembar, ama waxaad sicirada dib uga eegi kartaa barta Recology.com/Tukwila.
- **Faa'idooyinka cusub**  
Liiska faa'idooyinka cusub ayaa lagu soo daray hagahan.
- **Biilasha**  
Waxaad biilkaaga ugu horreeya ka heli doontaa Recology bisha Febraayo. Recology ayaa kharashaad soo dallici doontaa bishiiba mar. Waxaad awoodi doontaa inaad onlaynka ku bixiso biilasha barta recology.com/bill-pay/
- **Su'aalo? Ma jiraan isbeddelo adeegyo?**  
Ka wac xarunta adeegga Recology lambarka 206.994.3900 ama booqo Recology.com/Tukwila.



**En Español visitar:**

**Recology.com/Tukwilaoutreach**

## Adeegyada Qashinka iyo Faa'idooyinka Cusub ee Bilaabmaya 1-da Nofeembar, 2023



### Faa'idooyinka iyo Adeegga Macmiilka ee La Ballaariyay

#### • Adeegga Macmiilka

**Taleefoonka: 206.994.3900**

Isniinta ilaa Jimcaha 7 SUBAXNIMO – 7 GALABNIMO  
Sabtida iyo Axadda 8 SUBAXNIMO – 7 GALABNIMO

**Iimaylka: Tukwila@Recology.com**

**Recology.com/Tukwila**

- Hal qashan uruurin oo BILAASH ah oo la qorsheeyay oo cabbirkiisu dhan yahay ilaa 2 yaardi oo saddex jibbaaran oo qashin ah iyo 4 shay oo aan qalab ahayn (sida fadhi carbeedyada ama kuraasta waaweyn) sannad kasta.
- Uruurinta qashinka ee bilaashka ah ee Geedaha Ciidaha ee aan la googeyn, ee aan la qurxin ee loogu talagalay dhammaan macaamiisha deggan guryaha la dego.
- Gelitaanka Bakhaarka Recology/Xarunta Qashin Uruurinta ee Burien ee ku taala 15858 First Ave South.
  - Qaaddida sheeyaasha aan caadiga ahayn si dib loogu warshadeeyo si bilaash ah. Liiska dhammaystiran ee agabka la aqbalo ayaa ku jira hagahaan.
  - Eeg qalabka kala duwan ee lagu yareynayo qashinka yaala guriga.
  - Booqo si aad u hesho ikhtiyaarka adeegga macmiilka ee fool-ka-foolka ah.
- Takhasuslaha Waste Zero ee Waqti-buuxa Shaqeeya iyo Takhasuslaha Adeegga Macmiilka ee Tukwila waxay la shaqayn doonaan dugsiyada, kooxaha bulsheed, ganacsiyada, iyo qoysaska kala duwan si ay uga caawiyaan bulshadaada inay dhimaan qashinka oo lacagna ku dhaqaalaystaan!



### Gawaarida Qashin Uruurinta ee Cusub

- Gawaarida korontada ku shaqeeya ee loogu talagalay qaaddida carabiyada qashinka



### Faa'idooyinka Cimilada Xun ee La Ballaariyay

- Goobaha qashinka lagu qubo ee ku yaala Tukwila haddii cimilada xun ay qaataan wax ka badan hal toddobaad
- Uruurinta qashinka deyrka ee dheeraadka ah ee bilaashka ah kadib markay dhacdo duufaan

## Maxay tahay shirkadda Recology?



**Shirkadda Recology waa qashin-qaade iyo qashin-warshadeeye 100% ay shaqaaluhu leeyihiin.** Waxaan u adeegnaa 11 kale bulshooyinka Puget Sound oo ay ku jiraan Burien, Des Moines, iyo SeaTac. Hal ku dhigga shirkadda Recology waa *Duni Aan Qashin Lahayn*. Waxaan diiradda saareynaa wacyigelinta bulshada sida ay u yareeyaan qashinka iyadoo loo marayo dib-u-warshadeynta saxda ah iyo qooshka qashinka. Shirkadda Recology waxay sidoo kale ka hawgashaa California iyo Oregon oo dhan.

## Sidee lagu doortay shirkadda Recology?

Magaalada Tukwila waxay qabatay geedi-socodka RFP oo loo loollamay waxayna soojeedino ka heshay shirkado badan. Shaqaaluhu waxay ku sameeyeen dib-u-eegis balaaran soo jeedinadan oo ay ku jiraan booqashooyinka goobaha shirkadaha iyo wareysiyada kooxaha maamulka. Soo jeedinada ayaa markaa wax lagu go'aamiyay iyadoo la adeegsanayo qiimaha iyo adeegyada la bixiyay. Iyadoo loo marayo geedi-socodkan ayaa la xushay shirkadda Recology waxaana qandaraaska ansixiyay Golaha Magaaladda.

## Halka Qashinka Laga Qaado Lana Geeyo

Si aad u hesho liiska dhammaystiran oo qashinka dib loo warshadayn karo oo qooshka looga dhigi karo gudaha Tukwila, booqo: [Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/Tukwila).



Si aad hagayaasha kala-soocida qashinka oo daabacan ugu hesho luuqado badan: [Recology.com/recology-king-county/tukwila/sorting-guides/](https://www.recology.com/recology-king-county/tukwila/sorting-guides/).

Dib-u-warshadeyn	Qashinka Cuntada & Deyrka	Qashinka
<p>Dhalooyinka caaga ah, tubbooyinka, jeeggaga, iyo dhalooyinka</p>	<p>Cuntada haraaga ah</p>	<p>Bacda halka mar la isticmaalo</p>
<p>Dhalada</p>	<p>Baakadaha iyo jug-dhowraha fuushfuushka ah</p>	<p>Baakadaha iyo jug-dhowraha fuushfuushka ah</p>
<p>Biraha</p>	<p>Baakadaha wasakhaysan ee cuntada</p>	<p>Xafaayadaha iyo qashinka rabaayadaha (bacaysan)</p>
<p>Warqadaha iyo kartoonnada nadiifka ah</p>	<p>Qashinka deyarka</p>	<p>Dhoobka iyo quraaradaha</p>



## Keen sheeyaasha dib-u-warshadeyntoodu adag tahay Bakhaarka Shirkadda Recology.

SHAYGA	SHURUUDAHA DIYAARINTA
Nalalka iyo guluubyada iftiima	<ul style="list-style-type: none"> <li>Nalalka aan jabin oo keliya</li> <li>Tuubooyinka waa in aysan ka dheereyn 4ft (cag)</li> <li>Ku xaddid nalalka iyo/ama tuubooyinka 10 xabo halkii mar</li> </ul>
Baterida guriga	<ul style="list-style-type: none"> <li>Batariyadda aan la sharootaysnayn lama aqbalaayo. Ka dabool dhinaca togan iyo dhammaadka taban sharooto CAD OO LA ARKI KARO oo kaliya</li> <li>Ku xaddid 1/4 galoon halkii mar</li> </ul>
Qalabka elektarooniga iyo qalabyada	<ul style="list-style-type: none"> <li>2 x 2 x 2 cag ama wixii ka yar iyo in ka yar 60lbs (rodol)</li> <li>Telefishada shaashada fidsan leh waa la aqbalaan ilaa 40 inji ballac ah leh</li> <li>Alaabta shaqaynaya IYO kuwa aan shaqaynayn waa la aqbalaan</li> <li>Ku xaddid 3 shay halkii mar</li> </ul>
Qalabka yaryar	<ul style="list-style-type: none"> <li>2 x 2 x 2 cag ama wixii ka yar iyo in ka yar 60lbs (rodol)</li> <li>Alaabta shaqaynaya IYO kuwa aan shaqaynayn waa la aqbalaan</li> <li>Ku xaddid 3 shay halkii mar</li> </ul>
Dharka	<ul style="list-style-type: none"> <li>Waa inuu ahaado mid bacaysan oo nadiif ah (wasakh iyo dildilaac lahayn, laakiin waa inuu ka maran yahay caaryada, dhedo biyoodka, iyo walxaha halista ah)</li> <li>Barkimada sariirta LAMA Aqbal</li> <li>Ku xaddid 32 galoon halkii mar</li> </ul>
Baakadaha iyo jug-dhowraha fuushfuushka ah	<ul style="list-style-type: none"> <li>Noocyada la oggol yahay waa weelasha qashinka Styrofoam™ ee adag iyo weelasha qashinka ee nadiifka ah ee Styrofoam™</li> <li>Sheeyaashu waa inay nadiif ahaadaan oo engagan yihiin, aan lahayn koolo, summaddo, iyo calaamadaha qallinka ama midabadda</li> <li>Ku xaddid 32 galoon halkii mar</li> </ul>
La Isticmaalay cuntada saliida	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ku xir saliida weelal caag ah, nadiif ah, oo fur leh</li> <li>Saliidu waa inay nadiif ka ahaato qashinka</li> <li>Weelka waa in lagu calaamadeeyaa magac iyo cinwaan</li> <li>Ku xaddid 3 galoon halkii mar</li> </ul>
Baaskiilada la isticmaalay iyo qalabka baaskiilka	<ul style="list-style-type: none"> <li>Sheegaga ku jira gudaha baaskiilka LAMA aqbal</li> <li>Dhammaan baaskiilada kale ee nadiifka ah iyo qaybaha kale baaskiilka waa la aqbalaan</li> <li>Ku xaddid 3 halkii mar</li> </ul>
Haanta gaaska oo yar dhulluluboooyinka	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dhulluluboooyinku waa inay maran yihiin</li> <li>Haamo lama oggola. 1lb (rodol) cabbirka ugu weyn iyo haan saafi ah oo haanta gaaska ah</li> <li>Ku xaddid 3 halkii mar</li> </ul>
Buuggaga jaldiga adag leh	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ku xaddid 15 buug halkii mar</li> </ul>
Si lacag la'aan ah	<ul style="list-style-type: none"> <li>Xadhkaha La Koro \$2 midkiiba</li> <li>Xarkaha Nalalka ee Fasaxa \$1.50 midkiiba</li> </ul>

**BAKHAARKA RECOLOGY**

15858 First Ave S, #A100  
Burien, WA  
Talaadada ilaa Axadda, 10  
SUBAXNIMO – 5 GALABNIMO

@Recology\_Stores  
@RecologyStore

Store@recology.com  
Recology.com/Store

## Waxa Hadda La Sameyn Karo

### 1 La xiriir shirkadda Recology isla markiiba si aad ugu diyaargarowdo adeegga cusub markay tahay 1-da Nofeembar, 2023

Nala soo xiriir si aad u xaqiijiso macluumaadkaaga xiriirka iyo si aad u dejisato dookhyada lacag-bixinta ee aad rabto.

**Taleefoonka Recology 206.994.3900**  
**iimaylka [Tukwila@Recology.com](mailto:Tukwila@Recology.com)**  
**mareegta [Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/Tukwila)**

### 2 Ha ogaato shirkadda Recology adeegyadaada gaarka ah

Haddii aad haysato koodhka albaabka, tilmaamo gaar ah oo qashin uruurin, ama aad u baahan tahay adeegyada cusub, fadlan ka xaqiiji macluumaadkan kooxda adeegga macaamiisha ee Recology.

### 3 Macluumaad dheeraad ah ayaa goor dhow la heli doonaa

Waxaad ku heli doontaa macluumaad boostada oo ay ku jiraan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isbeddelada ku yimaada adeegyada shirkadda Recology. Macaamiisha degganayaasha ah qaarkood ayaa laga yaabaa inay beddelaan maalinta qashinka laga qaado laga bilaabo toddobaadka 1-da Nofeembar. Waxaad sidoo kale booqan kartaa [Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/Tukwila) si aad u hesho macluumaadka ugu cusub.

### 4 Wax ka ogow adeegyadeena iyo halka qashinka laga qaado lana geeyo

Dib-u-eeg dukumeentigan si aad wax uga ogaato faa'iidooyinka badan ee uu leeyahay heshiiska shirkadda Recology. Saacadaha adeegga macmiilka ee la dheereeya, gelitaanka bakhaarka Recology, qaaddida alaabta badan, iyo uruurinta geedaha fasaxa ee lacag la'aanta ah ayaa dhammaantood qayb ka ah faa'iidooyinka badan ee ku jira iskaashigaan cusub. Dib-u-eeg dib-u-warshadaynta qashinka cuntada & deyarka, iyo liisaska qashinka si aad alaabta saxda ah ugu ridi karto carabiyad kasta.



Ogow Wax Badan:  
[Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/Tukwila)

